# Golaha Wakiiladda

## WAAXDA SHURUUCDA, HADAL-QORAALKA IYO FADHIYADA

**Kal-fadhigii 45[aad] fadhigii 2[aad]**

***Axad, 07 March 2021***

**Quraanka: -** Md. Obsiiye

**Gudoonka: -** Gudoomiye Baashe M. Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Doodda Ajandaha Kal-fadhiga 45[aad] ee Golaha Wakiilada.

**Md. Cabdiraxman Maxamed Jaamac (Xoog)** **(8min 17sec):-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada iyo shaqaale waynahaba waxaan idinku salaamayaa Salaanta Islaamka, bacda Salaan, maanta waxaan in bilaabmay Dooda Ajandaha kal-fadhiga 45aad, waxaan anigu odhan lahaa wakhti badan ma haysano, waayo mudo xileedkeeniina Gabogabo ayuu ku dhaw yahay, wakhtigii Doorashaduna kaabiga ayuu inagu soo hayaa, bisha soo socotaana waa bishii barakaysnayd ee Ramadaan, taas micneheeduna waa in aynu haysano Hal bi loo kaliya.

Sidaa awgeed anigu waxaan qabaa in aynaan ajandaha isku baahin ( Short and Sharp), dhawr qodob oo laga hawl gali karo aynu ku koobno ayaan odhan lahaa ama aan soo jeedinayaa, waxaan ajandaha ka soo qaatay 3-Qodob, qodob waxaa weeyaan Warbixinta Shirgudoonka iyada oo aan ka saarayo Warbixinta joogtada ah sababta oo ah dadku way iska maqnaayeen oo waxay ku maqnaayeen kala saarida musharixiinta iyo wax la mid ah.

Markaa labada qodob ee hore oo ay aad iyo aad u muhiim tahay U yeedhista Masuuliyiinta dawladu, waayo hadii aanu nahay Guddida Arimaha Bulshada waxaa jira arin aad ugu muhiim ah oo ah Covid-19 oo aad iyo aad u soo batay oo dadkii Tarab-Tarab u laynaya in aanu ka Xog-waraysano guddidii halka ay wax marinayaan intii aanu iska hadli lahayn.

Qodobka 3aad ee Ajandaha waxaan ku soo koobi lahaa, Mudanayaal waxaad ogtihiin in la wado Tira koobkii shaqaalaha Dawlada iyo Hawlkab koodii, iyada oo hada kaadhkii Somaliland ee Hawl-gabka ee Da'ada laga beddelay la joojiyay iyada oo uu wasiirku sheegay in qof waliba uu dadiisa dhabta ah yaraynayo si aanu hawl-gab u galin.

Sidaa daraadeed iyada oo hawshaa baaxada leh ee diwaan galinta shaqaalaha dawladu ay socoto, Xeerkaa shaqaalaha dawladu waa muhiim, hadii aanu nahay gudidda arimaha

Bulshada Xeerkaasina waa naga diyaar, kaliya waxaa noogu hadhay in aan isha marino, markaa markaa waxaan soo jeedinayaa in xeerkaa loogu horaysiiyo ama kala labaad la nooga dhigo si aanu warbixintiisa aanu idiin siino loona ansixiyo.

Waxaa kale oo jira xeer aanu ka qayb qaatay oo aan aad iyo aad ugu nuux-nuuxsaday ka shaqayntiisa Xeerkaas oo ahaa Xeerka ka hortaga iyo xakamaynta ka ganacsiga Dadka iyo Tahriibka dadka, sida aad ka warqabtaa dad ayaa ku shaqaysta oo u samaystay gawaadhi oo dhalin yaradeenii ku guraya saxaraga Soodaan iyo Liibiya, iyada oo meedhiyaha la soo dhigo ilmihii oo la qaraacayo si looga helo waalidkooda dhaqaale iyada ka xildhibaano ahaana dhibtaasi ay na soo gaadho oo dadkii na doortay leeyihiin wax nagala qabta dhaqaalahaa oo ayna awoodin in ay kaligood bixiyaan.

Sidaa awgeed xeerkaasi mihiimadiisa ayuu leeyahay ee waxaan soo jeedinayaa in labadaa Xeer ee aan soo sheegay la siiyo mudnaanta 1aad oo laga kala dhigo qodobka 1ad iyo qodobka 2aad. Iyo warbixinaha aan soo sheegay oo bishaa inta inooga hadhay ay ka shaqayno ayaan leeyahay WSC.

**Md. Axmed Barkhad Obsiiye** **(3min 15sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim, Sidaa uu Cabdiraxmaan Sheegay waxaynu ku jirnaa kal-fadhigii ugu danbeeyay ee uu Golahani uu fadhiisto, sidaa awgeed 7da xeer ee ajandaha inoogu yaala waa in aynu wax ka qabanaa iyada oo ay warbixinadu sidoodii yihiin, ugu horay waxaan ka dhigi lahaa Wax-ka-beddelka iyo kaabista Xeerka Nidaamka Ururda iyo Asxaabta Siyaasada Xeer Lr. 14, waayo waa xeer aad iyo aad loogu baahanyahay.

Qodobka 2aad waxaan ka dhigi lahaa xeerarkii hore aynu Golahan ka ansixinay xeerarka la xidhiidha ee ay ka midka yihiin xeerka diwaan galinta shrkadaha Aaga Cashuuraha ka caagan iyo ka tamarta ayaa Iyana isku xigsiin lahaa, waxaa kale oo aan ku sii xigsiin lahaa Xeerka tahriibayaasha oo aad iyo aad inoogu badan oo dadkii yar-yaraa maanta la inagala hoos baxo oo maalin walba Saxarayaasha ku dhinta, waa in xeerkaana aan ka dhignaa xeerka 4aad.

Waxaan filayaa in aynaan intaa in ka badan aynaan ka gaadhsiinayn, golahana waxaan leeyahay ha la yimaado oo yaan la is dhiibin ee Golaha laga shaqeeyo oo dadka iyo dalkaba wax aynu u qabano wsc.

**Md. Xaamud Cismaan Cigaal** **(2min 46sec):-** Shir-gudoonka, Xildhibaanada, kaaliyayaasha iyo Saxaafadaba asc,wr,wb. Ugu horayn waxaan taageerayaa xildhibaan Barkhad in Xeer 14 loogu soo horaysiiyo, iyada oo ay marka horaba ahayd in xeerkaa la ansixiyo intii aynaan ansixin xeerka Guud ee Doorashooyinka oo ay wax badani kaga xidhnaayeen, sidaa awgeed inbadan ayaa dib loo dhigaye yaan dib loo dhin ee ha la soo dhigo ayaan leeyahay( Taageero ayuu helay).

Sida xildhibaanadii iga horeeyay ay sheegeen waxaa inoo hadhay waa hal bil, hal bilna xeer iyo laba iyo sadaxna laguma dhamayn karo hadii aanay ahayd Daba-ka- eri, ee waxaan leeyay xeerka ha laga daawo daba ka eriga ee cidii ku hadhay ayay hawli haysaaye xeerarka sidaa halaga daayo, sida xeerar badan oo hore inagu dhaafeen.

Sidaa awgeed waxaan ku nuuxnuunsanayaa oo aan taageeradeedana helay in xeerkaa la soo hor mariyo lagana dhigo qodobka 1aad inta kale ee hadhay wixii laga gaadhsiin karo siday u kala muhiimsanyihiin ha loo galo wsc.

**Md. Cabdiraxman Cismaan Caalin** **(3min 40sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Guddoomiye anigu dhawr Qodob ayaan doonayaa in aan ku noqdo, midi waa arrintaa uu ka hadlay xidhibaan Maxamed Xaaji Xuseen Ciise ee ahaa inta aynu 10-ka nidaamdno oo aynaan masuuliyad iska saarin waajibaadkeena waxba inoo socon maayaan. Waxa muhiim ah inaynu iska dhamayno intaas wixii aynu ka gaadhi karno. Waa in aynu xil isa saarnaa oo aan 10-ka ama 11-ka aan cid la sugin. Mudanayaashu xil ha isa saaraan oo wakhtiga ha dhawraan, hawl qabadkeenuna taas ayuu ku xidhnaanayaa.

Xeerka shaqaalaha maadaama oo uu jiro hawl badan oo ay Wasaaradu ku jirto, mudnaan ayuu leeyahay in la soo horumariyo waana naga diyaar ka Guddi ahaan koowaadna ha laga dhigo.

Qodobka 2aad waa xeerka Xisbiyada oo aan sababaynayo. Laba sababood ayaan sheegayaa oo inaga oo aan dhamaystirin ka tagin meeshaa. Midi waxa weeyaan Xibiyadeenii oo qaar caadaystay inay fadhiyaan 20 sanno ee u dambeeyey, Guddoomiyenimadiina afar xili u sharaxan, musharaxnimadiina afar xili u sharaxan, imikana sharaxan oo aan doonayn inay meesha ka tagaan oo doonaya maqaaxi ay leeyihiin inay ka dhigtaan, inaynu xeerkaas ku noqono sababta koowaad ayaan uga dhigayaa.

Ta labaad Koomiishankii aynu hawsha xisbiyada u diran waa hawlgab, mushahar ayuun bay sika qaataan labadaa sananood, markaa xeerka inaga oo aan dhamaystirin oo mudnaanta aan siin ayeynaan ka tagin.

Qodobka ajandaha kaga jira 7aad ee xakamaynta ganacsiga, oo ah in kii soo dejinayey iyo kii ka iibsanayey ay isku mid yihiin maanta. Inta uu dekedda kaga soo iibiyo ayuu hadana ka soo daba rarayaa kii uu wax ka soo iibiyey. Waa arrin muhiim ah oo taagan iyo Tahriibka dadka. Inta kale waxaan ku raacsanahay xildhibaanadii iga horeeyey.

Waxaan soo jeedinayaa in loo yeedho Wasiirka caafimaadka oo laga waraystaa xaalada Caafimaad ee Covid 19 oo Guddidu u yeedhi mayso ee waa in Goleweynaha uu horyimaadaa.

**Md. Maxamed Xaaji Xuseen Ciise** **(3min 0sec):-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka iyo Xildhibaanada kaleba way salaaman yihiin. Aslaamu Calaykum Warax

Matulaahi Wa Barakaatu. Guddoomiye waxa aan ku horaysiin lahaa maadaama uu kal fadhigani u muuqdo kii ugu dambeeyey, si aynu u dhamaystirno in la is xil qaamo oo xili hore Golaha la yimaado, oo ajendaha inta inoo qoran dhamayn kari mayno haddii aynaan dedaalin, waxaanay ku haboon tahay maadaama ajendaha inoo qorani yahay kii ugu dambeeyey waa inuu Goluhu dhameeyaa.

Guddoomiye iyo mudanayaal maadaama ajenduhu inoo qoran yahay waa in aynu dhamaynaa oo isaga oo dhamaystiran ku wareejinaa Golaha soo socda. Intaas waxaan ku darayaa ajenduhu sidaas uu u qoran yahay waan ku raacsanahay, sababtu waxa weeye wixii diyaar ah ayaa kolba inoo imanaya. Xildhibaanadii hore waxaan ku raacsanahay doodoodii iyo soo jeedimahoodii.

Guddoomiye Wadanka waxa ka jira laba xaaladood oo adag oo mid tahay Abaaraha oo aan filayo inuu barri ka hadlo Madaxweynuhu, ta labaadna waa xaalada Covid 19. Waxaad moodaa Qaran ahaan waynu ka yar gaabinay oo wacyigii ayaa hoos loo dhigay sidaas ayaanu kor ugu kacay. Haddii aad eegto Warbixinta Wasaarada caafimaadka maalin walba kor ayuu u socdaa, waa inta la baadho waanan la socdaa, waanu kordhayaa Guddoomiye iyo Mudnayaal. Waxaan odhan lahaa ha loo yeedho Wasiirka Wasaarada Caafimaadka oo ha ka warbixiyo. Markaa is bedel ayaa ku dhaxay is bedelkaasina xaalad kale ayuu keenay. Waana in loo kuur galaa. Waxaanan xildhibaanadii hore ku raacsanahay soo jeedimihii ay sameeyeen.

**Md Maxamuud Axmed Obsiiye (5min 25sec):-** Bismilahi raxamaani Raxiim. Shir-Guddoonka, Mudanayaasha sharafta leh, Saxaafada, Shaqaalaha iyo dadweynaha waxaan ku salaamayaa salaanta islaamka Aslaamu Calaykum Warax Matulaahi Wa Barakaatu.

Xeerarkan iyo wakhtigan ay yimaadeen waanu arkaynaa inay muhiimad gaar ah leedahay, waana in aynu tixgelino. Xeerarka aasaaska u ah horumarka dalka, isla markaana waxa ugu muhiimsana xeerarkan aanu gacanta ku hayno oo ama gebogabo ah ama dhammaadba ku dhaw. Marka laga yimaado warbixinta shir-guddoonka iyo Guddida Joogtada ah. Xeerka diyaarka ah ee aanu hore warbixintiisa loo dhiibtay waxaan qabaa in salaasadaba doodiisa la galo oo arbacadaba haddii la ansixinayo la ansixiyo.

Xeerkani waxa uu tusaale u yahay xeerarka dhaqaale ee dalka lagu maamulayey kuwooda ugu muhiimsan, xeerkii kale ee aaga cashuuraha iyo xeerka dekadaha waa la ansixiyey oo guurtida ayey horyaalaan. Waxa isna yaala xeerkii maalgashida oo ay tahay in wixii is raaci kara la israaciyo oo la dhamaystiro wixii dhaqaalaha ah, waayo dalkeenu waxa uu u baahan yahay kobcin dhaqaale iyo wax soo saar,isla markaan la tixgeliyo

shaqo abuurka ka imanaya, waanan soo jeedinayaa in ajendaha lagu soo darro xeerka maalgashiga.

Golaha Wakiilada waajib ayey ku tahay inay shaqadooda Gutaan,isla markaana ay khaatumadooda hagaajiyaan, waxaan odhan lahaa labadan bilood ha la dhamaystiro todabadan qodob ee ajandaha oo aynu sumcad kaga tagno Golaha, waxaan odhan lahaa xeerka liisamada Ganacsiga iyo Xeerka Maalgashiga oo lagu soo daro ha loogu horaysiiyo waayo waxa ku xidhan dhaqaale.

Waxa kale oo inaga Gudbay oo Madaxweynaha ka soo noqday Xeerka Tamarta, waxaanan kal fadhigii hore ansixinay xeerka sahaminta iyo soo saarida Shidaalka. Waxaan isna meesha yaala xeerkii ugu muhiimsanaa oo ah Xeerka Dakhliga Shidaalka. Xeerkan waa xeerka ay ku xidhan tahay Sahaminta iyo soo saarista Shidaalka oo ay tahay dakhligii la siin lahaa deegaamada shidaalka laga helo, waxaan odhan lahaa xeerkan ha la raaciyo xeerarkii hore ee la xidhiidhay si aanay caqabad uga iman Tamarta iyo Sahaminta iyo soo saarista Shidaalka.

Qodobkaasi waa qodob aad u mihiim oo haddii deegaanka Sahaminta iyo Shidaal soo saarinta u wax laga siin u malayn maayo inay ogolaanayaan in shidaal laga soo saaro. Waxaan xildhibaanada iyo Shir-Guddoonka u soo jeedinayaa in mudnaan gaar ah la siiyo deeganada Shidaalka laga soo saarayo ee xeerkan ku jira, haddii kale ma jiri doono shidaal la soo saari doonaa.

Waxaan ku raacsanahay in xeer 14 aynu eegno, waxaana loo baahan yahay qodobadan ajandaha ee inoo yaala aynu dhammaystirno walaalayaal. Waad mahadsan tihiin.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
---------------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSl**
------------------------------------------